Metro Health

Shuruucda Qaansheegadka & Ururinta Daynta					
Qaybta	**PFS**	Lambarka Shuruucdii Hore	**PFS-D153**	**Lambarka Shuruucda**	**PFS-04**
Taariikhda Hore	Julaay 2016	Taariikhda Dhaqangalka	Maarso 2019	Dib-u-eegista Xigta	Maarso 2020

Δ ***muujinaya isbeddel***

Bayaanka Shuruucda

Metro Health Corporation iyo Metro Health Hospital (la isku dhaho, "Metro") waa ururro aan macaash-doon ahayn, cashuur aan laga qaadin oo leh hadaf khayri ah oo ah inay siiyaan adeegyada daryeeylka caafimaadka degganayaasha mandaqadda adeegga koowaad iyo labaad ee Metro. Ujeedada Siyaasaddan ee Qaansheegadka iyo Ururinta Dayntu waa in la hubiyo in, marka la eego dedaalada Metro ugu jirto inay qaandhabto oo ururiyso adeegyada caafimaad ee ay bixisay, in bukaanada oo dhan loola dhaqmo si xaq ah oo macquul ah lana siiyo fursad ku filan oo ay ku codsadaan kaalmo dhaqaale (fiiri Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Metro) ama sameeyaan qorshayaal lacag-bixin kale. Siyaasaddan waxay khusayn dhammaan goobaha Metro Health Corporation iyo Metro Health Hospital.

Hal-Ku-Dhegyada

Iska-Bixin, Kaalmada Dhaqaale, Ururin

Baaxadda

Diiwaangalinta Bukaanka, La-taliyaha Dhaqaale ee Bukaanka, Wakiilada Adeega Macmiilka, Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka, Qaansheegad Xirfadaysan

Guud

Siyaasaddan waxay caddaynaysaa tallaabooyinka laga yaabo Metro inay qaado marka ay dhacdo inuu bukaanku bixin waayo lacagta adeegyada cusbitaalka iyo/ama daryeelka caafimaad ee rugta. Siyaasaddan sidoo kale waxay caddaynaysaa tallaabooyinka Metro ay qaadi doonto si ay u hubiso in dedaal ku filan la sameeyay si loo go'aamiyo in i bukaanku uu mutaystay kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Metro, kahor intayna bilaabin tallaabooyin dayn ururin oo caadiga ka baxsan oo ay ku doonayso inay daynta ku soo xeraysato.

Ujeedooyinka siyaasaddan, tixraacyada "bukaanku" waxay ka dhigan yihiin bukaanka ama dammiinkiisa, *sida*, qofka qaaday masuuliyadda dhaqaale ee bixinta lacagta lagu yeesho.

A. Metro waxay sababi dhammaan bayaanada qaansheegadka inay kujiraan:

(i) Guudmarka adeegyada daryeelka caafimaad ee ay Metro bixisay;

(ii) Guudmarka khidmadaha adeegyada noocan ah, oo leh bayaan faahfaahinta kala-saarista khidmadaha oo lagu bixin codsi; iyo

(iii) Xaddiga lacagta looga baahan yahay bukaanku inuu bixiyo.

B. Dhammaan bukaanada aan lahayn caymis ama dhinac saddexaad oo lacagta ka bixiya waxa si otomaatig ah loogu oggolaan Qiime-dhimista Iska-Bixinta sida ay dhigayso Siyaasadda

Kaalmada Dhaqaale ee Metro PFS-03. Qiime-dhimista Iska-Bixinta waa la beddeli haddii bukaanka mar dambe la go'aamiyo inuu u-qalmo kaalmada dhaqaale sida ay dhigayaan tilmaamaha dakhliga kusalaysan sida ku cad Siyaasaddaas, xaaladdaas oo qiime-dhimista kaalmada dhaqaale ay khusayn doonto halkii Qiime-dhimista Iska-Bixinta.

C. Marka la eego bukaan kasta oo isagu iska-bixinaya, Metro waxay hubin in Bayaanka Qaansheegadka cusbitaal ka saarista hore ee daryeelka ay kujirto bayaan shaac ah oo kusaabsan jiritaanka Qiime-dhimista Iska-bixinta, xaddiga ku taaganna waxay muujin Qiime-dhimistaas.

D. Metro waxay ku waafajin bukaanada iyada oo adeegsanaysa samaynta qorshayaal lacag-bixin oo loogu talogalay lacagta bukaanka ku taagan, iyadoo isticmaalaysa Barnaamijka Lacag-bixinta Daryeelka Metro. Ilaa haddii kale ay Metro qoraal ku oggolaatay ma ogiye, qorshaha lacag-bixin kasta wuxuu bixin doona (i) lacagta loo bixinayo si buuxda 48 bilood gadahood iyadoo kusalaysan lacagta taagan, kadib taariikhda daryeelka (la kordhin karo xaaladda lacagta taagan ay aad u badan tahay), iyo (ii) bixinta lacagta billaha ah oo ugu yar oo ugu yaraan ah $25 iyadoo kusalaysan baaqiga lacagta la leeyahay. Barnaamijka Lacag-bixinta Daryeelku waa barnaamij bilaa dulsaar ah.

E. Iyadoo ku xidhan raacista qodobada siyaasaddan, Metro waxa laga yaabaa inay qaaddo wax kamid ah ama dhammaan tallaabooyinka sharciga ah, oo ay kujirto Tallaabooyinka DaynUrurinta Caadiga ka Baxsan, si ay u hesho lacagta adeegyada daryeel ee la bixiyey.

F. Metro ku kici mayso wax ka Baxsan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ah, si toos ah ama hay'ad dayn ururin ama wakiil kale, kahor inta aan dedaal badan loo galin si loo go'aamiyo haddii bukaanku uu mutaystay kaalmada sida ay dhigayso Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Metro. Si taas loo gaadho:

(i) Metro ku kici mayso wax ka Baxsan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga muddada Ogaysiinta.

(ii) Metro waxay shaacin jiritaanka kaalmada dhaqaale iyadoo isticmaalaysa hababka ku cad Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Metro, oo ay kujiraan:

- Ku dhejinta boodhadh xarumaha Metro;
- Soo dhijinta Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale, Dalabka Kaalmada Dhaqaale, iyo Guudmarka oo Luuqad Fudud ugu Qoran websaytka Metro;
- Ku darista Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran agabka diiwaangalinta bukaanka iyo buug-gacmeedka bukaan-jiifka; iyo
- Ku darista Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran agabka la siiyo bukaan kasta kaqayb ahaan diiwaangalinta ama saarista.

(iii) Metro waxay hubin in Shuruucda Kaalmada Dhaqaale, Dalabka Kaalmada Dhaqaale, iyo Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran ee lagu qoro Ingiriisida iyo ugu yaraan luuqad kale oo kasta taasi oo ah luuqadda koowaad ee in ka yar (i) 1,000 qof, ama (ii) 5% ee dadwaynaha mandaqadaha adeegga koowaad iyo labaad ee Metro.

(iv) Muddada Ogaysiinta, Metro waxay siin doontaa bukaan kasta ugu yaraan saddex Bayaan Qaansheegad (in kastoo Bayaano Qaansheegadyo kale aan loo baahanyn la diro, marka bukaanku uu gudbiyo Dalabka Kaalmada Dhaqaale), kuwaasi oo mid kasta ay kujirto bayaan shaac ah oo la xidhiidha jiritaanka kaalmada dhaqaale, oo ay kujiraan:

- Bayaan shaac ah oo la xidhiidha jiritaanka kaalmada dhaqaale;
- Lambar taleefan oo loogu talogalay macluumaadka kusaabsan Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale iyo habsocodka dalabk; iyo
- Cinwaan websayd kaasi oo Shuruucda Kaalmada Dhaqaale, Codsiga Kaalmada Dhaqaale, iyo Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran ee la heli karo.

(v) Haddii bukaan uu la soo xidhiidho Metro isagoo raba macluumaad la xidhiidha suurogalnimada kaalmada dhaqaale, Metro waxay siin doontaa bukaankan, si bilaa lacag ah, nuqul kamid ah Shuruucda Kaalmada Dhaqaale, Codsiga Kaalmada Dhaqaale, iyo Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran. Sidoo kale, Metro waxay hubin in bukaanka loo gudbiyo Wakiil ka tirsan Metro si uu uga helo sharraxaad dheeraad ah iyo kaalmo marka loo baahdo.

G. Marka ay dhacdo in Metro ku talogashay inay samayso mid ama wax ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan, Metro waxay u diri ama gaadhsiin bukaanka Ogaysiiska Dayn Ururinta ka Horreeya kaqayb ahaan bayaankeeda qaansheegadka ee 3aad, ugu yaraan 30 maalmood kahor bilaabista Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan. Ogaysiiska Daynta Ururinta ka Horreeya iyo bayaanka qaansheegadka ee 3aad, waxa kujiri doona dhammaan waxa soo socda:

(i) Bayaan Metro ugu talogashay inay ku bilawdo mid ama ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan (aqoonsiga tallaabooyinka dayn ururinta ee cayiman ee ay qaadayso) si ay u hesho lacagta ka maqan;

(ii) Taariikh (taasi oo ah ugu yaraan 30 maalmood kadib taariikhda Ogaysiiska Dayn Ururinta Kahor) taasi lacag-bixinta ay tahay in la sameeyo si looga fogaado Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan oo gaarka ah;

(iii) Bayaan shaac ah kaasi oo sheeegaya in kaalmo dhaqaale la heli karo iyadoo la raacayo Shuruucda Kaalmada Dhaqaalaha; iyo

(iv) Nuqul kamid ah Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran

Waxa laga yaabaa inaan xaaladna lagu dirin ama la gaadhsiin Ogaysiiska hore ee Ururinta Daynta ama aan bukaanka loo dirin xilli ka horraysa 30 maalmood kahor dhammaadka Muddada Ogaysiinta. Muddada 30 maalmood ee ka dambaysa dirista ama gaadhsiinta Ogaysiiska Dayn Ururinta ka Horreeya, Metro waxay sii wadi doontaa inay samayso dedaal badan si ay hadal ahaan u ogaysiiso bukaanka jiritaanka kaalmada dhaqaale.

Haddii Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan lagu soo qaado lacag dhacdooyin daryeel oo badan, jadwalka ku lammaan Muddada Ogaysiinta (120 maalmood) iyo Muddada Codsiga Kaalmada Dhaqaale (240 maalmood) ayaa la cabbiri doonaa iyadoo la eegayo dhacdadii daryeel ee ugu dambaysay ee la bixiyey (gaar ahaan, laga bilaabo taariikhda Bayaanka Qaansheegadka saarista kadib ugu horreeyey daryeelkaas).

H. Kadib Muddada Ogaysiintu marka ay dhammaato, Metro waxa laga yaabaa inay u qaado mid ama wax ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan sida soo socota:

(i) Haddii bukaanku aanu uCodsan kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso Shuruucda Kaalmada Dhaqaale maalinta u dambaysa ee Muddada Ogaysiinta, Metro waxa laga yaabaa inay bilawdo Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan, laakiin kaliya kadib marka Warqadda Ururinta Daynta Kahor la siiyey muddo dhan 30 maalmood ugu yaraan ay ka soo wareegtay.

(ii) Haddii bukaanku codsaday kaalmada dhaqaale laakiin go'aan lagu gaadhay in bukaanku aanu u-qalmin sida ay dhigayso Shuruucda Kaalmada Dhaqaale ee Metro, Metro waxa laga yaabaa inay qaado mid ama wax ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan.

(iii) Haddii bukaanku gudbiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale oo aan dhammaystirnayn kahor intaysan dhamaan Muddada qabashadaCodsiga, markaa Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan waxa laga yaabaa inaan la bilaabin ilaa habsocodka soo socda la dhammaystiro:

- Metro waxay siisaa bukaanka ogaysiis qoraal ah oo sharxaya macluumaadka dheeraadka ah ama waraaqaha loo baahan yahay si loo dhammaystiro Codsiga Kaalmada Dhaqaale;
- Metro waxay siisaa bukaanka ugu yaraan 30 maalmood kahor ogaysiiska qoran ee Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee laga yaabo inay Metro qaado kuwaasoo ka dhan ah bukaanka haddii Codsiga Kaalmada Dhaqaale aan la dhammaystirin ama daynta aan la bixin taariikh cayiman; *haddii, hase yeeshee*, wakhtiga kama-dambaysta ah ee dhammaystirka ama lacag-bixinta laga yaabo inaan la qaban kahor dhammaadka Muddada Codsiga;
- Haddii bukaanku uu dhammaystiray Codsiga Kaalmada Dhaqaale oo Metro-na si cad ugo'aamiso in bukaanku aanu mutaysan wax kaalmo dhaqaale ah, Metro waxay siin doontaa bukaanka fursad si uu u samaysto qorshe uu lacagta ku bixiyo kahor bilaabista (Metro) Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan; iyo
- Haddii bukaanku ku guuld daraysto inuu dhammaystiro Codsiga Kaalmada Dhaqaale taariikhda la cayimay ee ku qoran ogaysiiska qoran, Metro waxa laga yaabaa inay qaado mid ama wax ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururin Caadiga ka Baxsan.

(iv) Haddii Codsiga Kaalmada Dhaqaale (ha noqdo mid dhammaystiran ama aan dhammaystirnayn) uu bukaanku gudbiyo marka uu doono Muddada Codsiga,

Metro way hakin wixii Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee socda ilaa iyo inta Kaalmada Dhaqaale ee bukaanka la sugayo.

I. Metro waxa laga yaabaa inay oggolaato hay'adaha dayn ururinta dibadda ee iyada matalaya inay sameeyaan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan oo waafaqsan qodobada sare ku cad iyo sharciga khuseeya. Hase yeeshee, Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee la soo jeediyo inay samayso hay'ad dayn ururin oo dibadda ah waxay u baahan oggolaanshaha Metro marka hore xaalad kasta oo gaar ah marka la eego bukaanka gaarka ah iyo daynta.

J. Daymaha lagu leeyahay bukaanada awooda, laakiin aan rabin, inay iska bixiyaan lacagta adeegyada Metro waxa loo tixgaliyaa daymaha raagay; daymahan waxa loo gudbin doonaa hay'adaha dibadda si looga soo qaado. Daymaha bukaanada u-qalma kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso Shuruucda Kaalmada Dhaqaale ee Metro, laakiin ku guul daraystay inay iska bixiyaan lacagta ku taagan markay gaadho wakhtigeeda, waxa loo tixgaliyaa daymaha raagay lacagahan taagan; daymahan waxa loo gudbin hay'adaha dibadda si looga soo qaado.

K. Metro waxay dadwaynaha si bilaash ah ku siin doontaa nuqullada Shuruucda Qaansheegadka iyo Dayn Ururinta. Shuruucdan Qaansheegadka iyo Dayn Ururinta sida qaalibka ah waxa la soo dhigi, lagu shaacin, oo haddii kale lagu heli si la mid ah sida loo helo Shuruucda Kaalmada Dhaqaale ee Metro. Metro waxay hubin doonaa in Shuruucda Qaansheegadka iyo Dayn Ururinta oo ku qoran Ingiriisi iyo ugu yaraan luuqad kale oo kasta taasi oo ah luuqadda koowaad ee in kayar (i) 1,000 qof, ama (ii) 5% ee dadwaynaha mandaqadaha adeegga koowaad iyo labaad ee Metro.

L. Haddii Metro ay u gudbiso ama ka gaddo daymaha bukaanka dhinac kale Muddada Codsiga, Metro waxay la gali doontaa heshiis qoran dhinacan kaasi oo waajib kaga dhigaya dhinacan inuu:

(i) Ka fogaado ku kicista Tallaabooyinka Dayn Ururin Caadiga ka Baxsan ilaa Muddada Ogaysiintu ay dhammaato iyo ugu yaraan 30 maalmood inay ka soo wareegaan ilaa marka Warqadda Ururinta Daynta Kahor loo diray ama la gaadhsiiyey bukaanka;

(ii) Joojiyo wixii Tallaabooyinka Dayn Ururin Caadiga ka Baxsan haddii bukaanku gudbiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale Muddada Dalabka; iyo

(iii) Haddii bukaanka la go'aamiyo inuu mutaystay Kaalmada Dhaqaale, hubiyo in bukaanka aan la waydiin ama lagu waajibin inuu bixiyo (iyo aanu bixin) ka badan inta la rabo, uu beddelo wixii Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee hore loo qaaday.

Qeexitaano

Muddada Dalabka: Wakhtiga gudihiisa ay Metro tahay inay aqbasho oo ay ka hawlgasho dalab loogu talogalay kaalmada dhaqaale iyadoo la raacayo Shuruucda Kaalmada Dhaqaale ee Metro. Nuqullada Shuruucda Kaalmada Dhaqaale ee Metro iyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale waxa laga heli karaa https://metrohealth.net/about-metro-health/billing-payment-options/financial-assistance/. Muddada Dalabka wuxuu bilaabmaa taariikhda adeegyada daryeelka caafimaadka la bixiyo wuxuuna dhammaanayaa

maalinta 240-naad kadib marka Metro ay bixiso Bayaanka Qaansheegadka Saarista kadib ee daryeelka.

Wakhtiga Kama-dambaysta ah ee Kaalmada Dhaqaale: Taariikhda ka dambaysa marka Metro Health laga yaabo inay bilawdo Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee ka dhanka ah shakhsiyaadka masuulka ah ee ku guul daraystay inay gudbiyaan Codsiga Kaalmada Dhaqaale. Wakhtiga kama-dambaysta ah waa in lagu cayimo ogaysiis qoran oo ku socda shakhsiga masuulka ah oo la siiyo ugu yaraan 30 maalmood kahor wakhtiga kama-dambaysta ah, laakiin kahor 120 maalmood.

Dhammaystirka Codsiga Kaalmada Dhaqaale: Taariikhda ka dambaysa marka Metro Health laga yaabo inay bilawdo ama ambaqaaddo Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee ka dhanka ah shakhsiyaadka gudbiyey FAP aan dhammaystirnayn. Taariikhda dhammaystirka waa in lagu cayimo ogaysiis qoran waana inayna ka horrayn wixii ka dambaysa a) 30 maalmood kadib marka ogaysiiska la bixiyey ama b) maalinta u dambaysa muddada dalabka.

Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan: Tallaabo kasta oo ka dhan ah bukaanka oo la xidhiidhta ka helista lacagta bukaanka lagu leeyahay, halkaasi oo tallaabadan u baahan tahay hab sharci ama xukun. Tusaale ahaan, Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan waxa kujira inta badan noocyada haysashada hantida, xaraashka hantida ma-guurtada ah, qabashada xisaabaha bangiga ama hantida gaarka ah, bilaabista tallaabo madani, sababista xidhitaan ama amar maxkamadeed oo soo qabasho, la wareegis mushaharka ama dakhliga kale. Tibaaxda Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan sidoo kale waxa kujira ugudbinta warbixinta daynta bukaanka xafiiska ama hay'adda daynta. Tibaaxda Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan kuma jiraan haysashada hantida ay Metro ku caddaysay dacwadaha go'aanka dhaawac qof ahaaneed, xalka ama tanaasulka, amase xeraysiga sheegada dacwad masalifad.

Xisaabka Iska-Bixinta: Qaybta xisaabta bukaanka ee qofku ka masuul yahay kadib marka lacagaha uu bixiyo caymiska daryeelka caafimaad ama dhinac saddexaad (oo ay kujiraan bixin-wadaagyada, caymis-wadaagga iyo waxyaabaha laga jaro), wixii ka dhaafis ah ee la sameeyey iyadoo la eegayo codsiga kaalmada dhaqaale ee bukaanada.

Qiime-Dhimista Iska-Bixinta: Qiime-dhimista caadiga ah waa laga daayey khidmadaha dhammaan bukaanada iska-bixinta loo aqoonsaday kuwaasi oon u-qalmin kaalmada dhaqaale.

Hay'adda Dayn Ururinta: Shirkad heshiis lala galay taasi oo soo ururisa lacagta bukaanka lagu leeyahay iyadoo ka wakiil ah Metro Health waxayna raacdaa dhammaan ku-camalfallada Ururinta Daynta ee Xaqa ah.

Lacag-bixinta Daryeelka: Ikhtiyaar maalgalin kaasi oo kuu oggolaanaya inaa iskaga bixiso lacagta kugu taagan si bille ah oo la maarayn karo muddo dheer iyada oon dulsaar lagu saarin.

Bayaanka Qaansheegadka: Wixii ogaysiis la diray ama gaadhsiiyey bukaan kaasi oo lagaga codsanayo inuu lacagta soo bixiyo. Ogaysiisku wuxuu noqon karaa Bayaanka Qaansheegadka saarista kadib ee ugu horreeya dayreelka, wixii Bayaan Qaansheegad bille caadi ah intaa kadib, ama Warqadda Dayn Ururinta Kahor.

Wakiilada Adeegga Macmiilka: Shaqaale ka tirsan Xafiiska Adeegga Macmiilka ee Metro kuwaasi oo bara bukaanada siyaasadaha dhaqaale ee Metro, oo ay kujiraan laakiin aan ku ekayn Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale iyo shuruudaha Siyaasadda Qaansheegadka iyo Dayn Ururinta.

Muddada Ogaysiinta: Muddada lagu jiro inta ay thaay Metro inay ogaysiiso bukaanka jiritaanka kaalmada dhaqaale. Muddada Ogaysiintu waxay bilaabataa taariikhda koowaad ee daryeelka la siiyo bukaanka waxayna dhammaataa maalinta 120aad kadib marka Metro ay siiso Bayaanka Qaansheegadka ka saarista isbitaalka kadib ee daryeelka ugu horreeya .

Lacagta ku Taagan Bukaanka: Wixii baaqi taagan ee ayna bixin caymiska, bixiyaha dawladdu, ama cid kale oo saddexaad.

Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran: Guudmarka qoran ee Shuruucda Kaalmada Dhaqaale Metro, nuqul kamid ah waxa uu ku lifaaqan yahay Siyaasadda waxaana laga heli karaa https://metrohealth.net/about-metro-health/billing-payment-options/financial-assistance/. Guudmarka Luuqadda Fudud ku Qoran waxa loo shaacin doonaa sida ku qeexan Shuruucda Kaalmada Dhaqaale.

Ogaysiiska Dayn Ururinta Kahor: Bayaan Qaansheegad oo ay u diro ama gaadhsiiyo bukaanka Metro ugu yaraan 30 maalmood kahor bilaabidda mid ama ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan ee ka dhanka ah bukaanka, kaasi oo muujinaya ku talogalka Metro ee inay bilawdo mid ama ka badan Tallaabooyinka Dayn Ururinta Caadiga ka Baxsan si ay u hesho lacagaha wakhtigoodu taagan yahay, oo ay kujiraan waxyaalaha kale ee kujira ee la rabo kuwaasoo ku qeexan Qaybta IV.G.

Reference(s)

U.S Bankruptcy Code, Title 11
http://uscode.house.gov/browse/prelim@title11&edition=prelim

I.R.S. Revenue Code, Section 501(r)
https://www.irs.gov/charities-non-profits/charitable-organizations/new-requirements-for-501c3-hospitals-under-the-affordable-care-act

Guddida Oggolaanshaha Guddida Meertada Dakhliga Guddida ⊿ 2/13/2019 Taariikhda